

Waxaad halkan aad ka heli dhamaan arimha aad ubaahan tahay inaad ka ogaatid Ee kusaabsan qiimaynta lagu sameeyo daryeelaha

Daryeelayaasho sidoo kale waxay leeyihiin xuquuq!

Haddii aad tahay qof bilaash ku daryeela ninkeeda/xaaskiisa, qof kamid ah qoyskiisa amaba qof saaxiikiis ahba, qofkaas oon adiga la'aantaa aan qabsan Karin arimihiisa, waxaad xaq uleedahay in qiimayn lagugu sameeyo qiimaynta daryeela ahaan.

Sharci kusub oo lagu magacaabo Sharciga **Sharciga**

Daryeelayaasha(Sinaanshaha Fursadaha) – ayaa waxa uu daryeelayaasha siin kale doorashooyin badan iyo fursado fiican.

Ba ubaahnid oo kaliya inaad lanooshahay qofka aad daryeeshid, waxaadna xaq uleedahay in qiimayn lagugu sameeyo xataa haddii aadan ubaahnayn inaad caawin kaheshid qaybta Sooshaalka.

Daryeelayaasho waa dhamaan daha kale duwan. Qof daryeela ahi waxa uu noqon karayaa:

- Qof wayn oo daryeela qof kale oo da'wayn
- Qof wayn oo daryeela ilmo caruur ah oo naafo ah
- Qof da'diisu kyartahay 18 sano oo daryeela waalidkiis

Maxaan ooga baahanahay qiimayntan

Qiimayntani waxay kuutahay fursad ood nagala hadashid wixii caawin ah ee ooga baahan tahay daryeelka aad samaysid ood caafimaadkaaga jidh ahaan iyo niyad ahaana ay uhaan lahaayeen kuwo fiican. Sida caadiga ah waxaad arinkaas kale sheekaysan qof kasocda qaynba Sooshaalka amaba qof khabiir caafimaad waxuu kaloo noqon karayaa qofkaasi qof ay qaybta Sooshaalku ogolaatay inuu samayn karayo qiimaynaha noocan oo kale ah.

Qaybta Sooshaalku waxay qiimayntan u isticmaali inay go'aan kaga gaadho nooca caawinta ay tahay inay soo gudbiyaan.

Qiimayntu waa mid nooc ee ah?

Sida caadiga ah qiimayntu waa kulan fool ka fool ah. Mararka qaar waxay dhici adiga oo lajooga qofka aad daryeeshid, waa haddii aad labadiinuba ogolaataan arinkaas.

Waxaa kale ood heli karaysaa in qiimayntu noqoto xili kale.

Waxaad heli karyaa in inta ay socoto qiimayntu waxaad soo kula joogi karaya qof saaxiibkaaga ama mid kuu dooda.

Su' aalaha lagu waydiin waa sidan

- Maxaad u qabataa qofkan aad daryeeltid?
- Awood miyaad uleedahay inaad sii wadid daryeelka aad?
- Miyaad shaqaysaa, ma jeceshay inaad shaqaysid?
- Ma rabtaa inaad samaysid wax tababar ah ama waxbarashada dadka waawayn?
- Ma jirtaa arimo aad xiisaysid inaad samaysid ood daryeelka aad qofkan usoo gudbisid ay kaa hortaagan yahay inaad samaysid arimhaas aad xiisaysid?

Qaybta Sooshaalku waxay kusiin karaysaa caawin toos ah, ama waxay qofka aad daryeeshid siin karayaan caawin toos ah.

Maxay tahay inaan sameeyo

Waxaad kafikirtaa baahiyahaaga iskuna day inaad si fiican u cadaysid heerka caawinta aad maarayn karaysid.

Qiimaynta kadib

Qiimaynta kadib waxaa laguusoo diri nuql kamid ah su'aalihii qiimaynta lagugu waydiiyay iyo qorshe waxqabad eed eed isku afgarateen qofkii qaynta sameeyay. Haddii aad codsatay adeeg/caawin, waxaa ayana lagu soo diri ogolaanshaha kharashkii laguysku af-gartay.

Waxaan xil iska saaraynaa inaad macluumaad kahaysid arimahan:

- Talaabada xigta ee dhici
- Caday ay tahay inaad laxidhiidhid haddii caawin ubaahatid
Taariikhda aan dib u eegis kusamaynayno baahiyahaaga si aan u habsano in caawin aad kusoo gudbinayno ay tahay mid kugu haboon

Haddii aadan ku qanacsanayn natiijadda qiimaynta, waxaad heli karaysaa inaad cabasho go'aankaas aad kamuujisid.

Sida loo codsado qiimayn in lagugu sameeyo

Qofka madaxa amaba xidhiidhiyaha usheeg qofka aad daryeeshid. Haddii aadan iminka wax xidhiidh ah lalahayn qof dhinaca Sooshaalka ah, waxaad kale xidhiidhi karaysaa cinwaankan

Carers Support Team
Haringey Social Services
40 Cumberland Road
London N22 7SG

Taleefoonka: 020 8489 3967

Emailka: carerssupportteam@haringey.gov.uk